# Dokumentiga waxa laga filayo dugsiyada xannaanada degmada Tibro

Dugsiga xannaanada shaqada loo igmaday waa inuu ilmo kasta u abuuro duruufaha ugu fiican ee keenaya intii suurtagal ah inuu horumar sameeyo. Si taasi ay u suurtogasho waa inay jirto wada shaqayn kalsooni buuxda ku dhisan oo u dhexaysa guriga iyo dugsiga xannaanada (Lpfö18).

Dugsiyada xannaanada Tibro waxay hiigsanayaan inay wada shaqayn is aaminaad buuxda ku dhisan la yeeshaan waalid kasta taasoo aan isku aragno dad wada shaqayn ka dhexayso oo danta ilmaha xoogga saarno.

Waxbarashada dugsiga xannaanada waxaa haga qawaaniin iyo shuruuc. Si waxbarashadu u noqoto mid la dhawrayo xuquuqda qofka oo la isku hubo tayadeeda waxaa khasab ah inay macalimiinta iyo waalidiintu raacaan shuruucda jirta.

Marka la wada shaqaynayo waxaa muhiim ah in la ogaado waxaan kala filan karno. Sidaas darteed waxaan haddaan nahay degmada Tibro samaynay dokumentiga filashada kaasoo ay ku qoran yihiin waxyaalo adiga waalidka ah aad ka filan kartid dugsiga xannaanada iyo waxa annaga dugsiga xannaanada jooga aan kaa filayno waalid ahaan.

## Waxyaalahan baad waalid ahaan ka filan kartaa dugsiga xannaanada:

### Ku aamin qabid, xannaano, horumarin iyo waxbarasho

- In adiga iyo ilmahaagu si fiican la idiin baro dugsiga xannaanada.
- In dugsiga xannaanada waxbarashadiisa la raaco sharciga iskuulka iyo manhajka waxbarashada dugsiga xannaanada.
- In waxbarashada la waafajiyo bisaylka, baahida iyo duruufaha ilmahaaga.
- In dugsiga xannaanada uu ka duulo waxa ilmaha u fiican (danta ilmaha) markii go´aan la gaarayo.
- In adiga iyo ilmahaaga la idin kula macaamilo xushmad.
- In dhammaan macalimiintu ka shaqeeyaan in ilmahaagu is aamino oo aamino karaankiisa.
- In dhammaan macalimiintu ka shaqeeyaan inay u abuuraan dhammaan carruurta inay wadajir dareemaan, maqsuud noqdaan oo bey´ad la isku hubo ilmahaagu ku sugnaado.
- In dhammaan macalimiintu ka shaqeeyaan inay ka hortagaan xadgudubyada iyo takoorka.
- In ilmahaaga lagu casumo cunto nafaqo leh maalinta gudaheeda.

### Warbixin iyo ka qaybqaadasho

- In ilmahaagu fursad u helo inuu muujiyo aragtidiisa oo dareemo inuu qayb ka yahay.
- In macalimiintu xiriir kula sameeyaan haddii wax gaar ah dhaceen maalinta gudaheeda ama haddii ilmahaaga xaaladiisa guud ka darto ama ilmuhu xanuunsado.
- In macalimiintu kaala hadlaan xannaanada ilmaha, horumarka iyo waxbarashada markii lasoo kaxaynayo iyo markii la gaynayo iyo sidoo kale wada hadalka horumarka ardayga ee sannadlaha ah.
- In aad heshid warbixin cad iyo ka warqabid waxbarashada iyadoo loo marayo Infomentor, wada hadalka horumarka ardayga iyo sidoo kale kulamada waalidiinta.
- In laga qaybqaato qiimaynta shaqada iskuulka iyadoo loo marayo ra´yi aruurinta waalidiinta.
- In dhammaan macalimiinta waajib sir xajin saaran yahay sida aw dhigayo sharcig hawlaha danta guud iyo sir xajinta.

- In dhammaan macalimiinta waajib ku tahay soo sheegidda (wixii Ilmaha khatar ku ah) sida uu dhigayo sharciga adeegga bulshada iyo sharciga iskuulka.

### Tayo iyo qiimayn

- In macalimiintu si joogta ah uga fekaraan oo si nidaamsan u hubiyaan tayada shaqadeena iyadoo ujeedadu tahay in la hagaajiyo waxbarashada.
- In macalimiinta xirfadooda shaqo si joogto ah loo horumariyo.
- In macalimiinta si joogto ah loo baro badbaadada wadnaha iyo sanbabada loogu talogalay carruurta iyo sidoo kale amniga dabka.

## Waxyaalahan baan kaa filaynaa adiga waalidka ah/ ilmaha ka mas´uulka ah:

### Wada shaqayn iyo danayn

- In aad mas´uul ka tahay ilmahaaga barbaarintooda iyo horumarkooda.
- In aad la shaqaysid dugsiga xannaanada si loo horumariyo xannaanada, horumarka iyo waxbarashada ilmaha.
- Inaad muujisid xiise iyo danayn ku aadan waxa ilmuhu ku sameeyo oo ku baranayo dugsiga xannaanada iyo inaad la socotid warbixinta lasoo dhigo Informentor ama lagu soo dhejiyo iridda hore.
- In aad wax wanaagsan ka sheegtid dugsiga xannaanada markii guriga la joogo oo aad ilmaha kala hadlaysid.

### Soo kaxayn iyo keenid

- In aad la xiriirtid macalin inta aadan ilmaha keenin ama aadan ka kaxaysan dugsiga xannaanada.
- In aad mas´uul ka tahay ilmahaaga inta aadan ku wareejin macalin markii aad keenaysid iyo sidoo kale in macalin kugu wareejiyo markii aad kaxaysanasid.
- In aad soo sheegtid haddii qof kale ilmaha soo kaxaynayo ama keenayo.
- In aad soo sheegtid haddii aad soo daahaysid.
- In aad nagu soo wargelisid haddii guriga ay ka dhacaan wax saamayn ku yeelan kara ilmaha markii ilmuhu dugsiga xannaanada joogo.

### Jirro

- In aad raacdid shuruucda dugsiga xannaanada ee ku saabsan in carruurta jirran ay guriga joogaan inta ay ka caafimaadayaan oo ay ka awoodayaan inay dugsiga xannaanada ka qaybqaataan maalinta oo dhan.
- In aad xushmaysid sharciga in ilmaha guriga lagu hayo 48 saacadood kaddib markii u danbaysay ee lagu arko astaamaha cudurka calool xanuunka.
- In aad kalsooni ku qabtid inay sax tahay qiimaynta macalimiinta ee ku saabsan xaaladda guud ee ilmaha iyo suurtagalnimada inay ka qaybqaataan dugsiga xannaanada maalinta gudaheeda.

### Dhar

- In aad ka shaqaysid in ilmuhu ay wataan dhar ku haboon hawlaha firfircoonida guriga gudihiisa bannaankiisa iyo sidoo kale inay haystaan dhar dheeri ah oo ay ku beddeshaan.

### Xilliyada shaqada iyo jadwalka

- In aad xushmaysid oo raacdid dokumentiga “Regler för förskolan i Tibro kommun” ee quseeya waxyaalaha ay ka mid yihiin wakhtiyada jadwalka. Dokumentigu wuxuu ku jiraa bogga degmada Tibro.
- In aad isbeddellada ku meel gaarka ah ee ku saabsan wakhtiyada shaqada, maqnaanshaha ama fasaxa soo dhigtid Infomentor wakhti fiican ka hor si aan u qorshaysanno hawlaheenna.
- In aad soo gudbisid telefoon lambar shaqaynaya, cinwaan iyo magaca shaqo-bixiyaha haddii isbeddel yimaado.

- In aad keentid caddayn waxbarasho ama caddayn shaqo-bixiye markii lagaa dalbado.

## Warbixin iyo ka qaybqaadasho

- In aad nagu soo wargelisid xassaasiyadaha, jirrooyinka, lixaad dhimminaansho ama wixii isbedello ah ee ku yimaada xaaladda qoyska ee saamayn ku yeelan kara ilmaha.
- In aad la xiriirtid shaqaalaha haddii aad su´aalo iyo fikrado qabtid.
- In aad ka qaybqaadatid wada hadalka horumarka ilmaha iyo kulamada waalidiinta.
- In aad kasoo jawaabtid ra´yi aruurinteena waalidiinta.
- In aadan baraha bulshada soo dhigin qoraallo ama sawirro ay ku jiraan ilmo kale oo dugsiga xannaanada dhigta.

## Fikrado iyo cabasho

- In gacanta koowaad aad la xiriirtid dugsiga xannaanada haddii aad fikrado/cabasho qabtid iyo sidoo kale inaad ka qaybqaadatid in la helo xalal la wada keenay. In gacanta labaad aad la xiriirtid maamulaha.